

# Manaasikta Cumrada

Af-soomaali

صومالية

## Dawaafka

2



7 wareeg, ka bilaabanaya dhagaxa madow (Xajarul-aswad), kuna dhamaanaya isla dhagaxa madow.

Miiqaatka -(Meesha xajka iyo cumrada laga soo xidho)-reer Shaam iyo Masar waa Al-juxfah (186km)

Miiqaatka reer Madiina waa Dul-xulayfah (420km)

Miiqaatka reer Ciraaq waa Daatu-cirq (98km)

Miiqaatka reer Najdi waa Qarnul-manaasil (99km)

Miiqaatka reer Yaman waa Yalamlam (99km)

1

Xidhashada (Al-ixraam)

niyaysiga gelitaanka nusuga; cumrada

Dadka diyaaradaha ku yimaadda Xajka, waxa ay ka xidhanayaan Meesha ugu dhaw hawada miiqaatka, marka ay dul marayaan.

## Toddobo wareeg

Waad soconaysaa inta ka horraysa labada sumadood ee cagaaran, waanad ordaysaa orod xooggan inta u dhaxaysa labadooda, (ugaar ah ragga).

Safa

Marwa

In loo kala socdo inta u dhaxaysa Safa iyo Marwa

4

In lagu tukado gadaasha "Maqaamu-Ibraahiim" (haday suurowdo)

3

Waxyaabaha xidhashada (Cumrada) ku xaaraantimooba:

1 In timaha laga jaro madaxa ama jidhka.

2 In cidiyaha la iska guro. 3 Adeegsiga cadarka. 4 guursashada (meherinta) naftiisa ama cid kale.

5 La kulanka dumarka.

6 In la dilo ugaadha banka.

1 Sida dharka, ama xidhashada dharka tolan; waana dharka tolmadiisu ku cabiran tahay xubin ka mid ah xubnaha jidhka.

2 In madaxa lagu daboolo wax ku dhegan (taabanaya).

1 In wajiga lagu dedo niqaab ama burquc, laakiin haddii ay la joogto rag ajaanib ka ah, wajigeeda waxa ay ku dedaysaa shalamadda (xijaabka) ay wadato iyo wixii lamida.

2 Xidhashada gacmo-gashiga (galoofyada)

Xiirasho ama timo-gaabsi

5

Xiirashada iyo timo-gaabsigu waxa ay gaar u yihiin ragga, haweenayduna waxa ay timaheeda ka gaabinaysaa wax far caaradeed le'eg.

Qayb ka xaaraan ah ragga oo keliya:

Qayb ka xaaraan ah dumarka oo keliya:

## Sunneyaasha Cumrada:

1 In cidiyaha la iska guro, iyo inuu daayo timaha ay ku waajibka tahay inuu daysto ka hor intaanu niyoonin xidhashada (cumrada).

2 In loo qabaysto xidhashada cumrada 3 In jidhka la cadariyo (ugaara ragga)

4 Xidhashada hoosgunti iyo qayd (ugaara ragga).

5 Talbiyada: "labbaykallaahumma labbayk. Labbayka laa shariika laka labbayk. Innal-xamda, wannicmata laka mal-mulku. Laa shariika laka". Waxa uu akhrinayaa laga bilaabo xidhashada cumrada ilaa laga gaadho dawaafka.

6 Jeeni-qaarsiga xilliga dawaafka, ugaara ragga (waa inuu faydo "qaawiyo" garabkiisa midig).

7 Dhunkashada dhagaxa madow. 8 Guclaynta saddexda wareeg ee hore.

9 In labo rakcadood lagu tukado gadaasha "maqaamu Ibraahiim".